Region Stockholm

# Waxaa laguugu baahanyahay baaritaan ku aaddan caafimaadka gobalka Stockholm

Waad salaamantahay! Region Stockholm wuxuu rabyaa in uu kugu casuunyo in aad ka qeyb qaadatid baaritaanka Hälsa Stockholm. Wuxuu baaritaanku ku saabsanyahay caafimaadka gobalka Stockholm gudihiisa iyo sidii uu isu beddelyay intii ay socotay aafada corona. Ma kugu dhacyay covid-19, caadooyinkaaga nolosha wax ma ka beddeshay, ama caafimaadkaagu ma sii wanaagsanaaday ama sii xumaaday? Si kasta oo ay tahayba waannu daneyneyna jawaabahaaga.

Aqoonta baaritaanka laga helayo waxaa loogu baahanyahay si daryeelka iyo dadaallada caafimaadka bulshada loo waafajiyo baahidaada iyo baahida dadka kale. Waxa aan baranno waxaan la wadaageynaa laamaha caafimaadka, siyaasiyiinta, cilmi baarayaasha iyo dad weynaha.

## Jawaabahaagu waa muhiim

Waxaad tahay mid ka mid ah ku dhawaad 120 000 qof oo reer Stockholm ah oo si ku nasiibsasho ah loo soo doortay oo gacan ka geysan kara shaqadeenna fahmidda iyo sii hagaajinta caafimaadka gobalka. Ka qeyb qaadashadu maaha mid khasab ah, laakiin ka qeyb qaadashadaadu waa muhiim maxaa yeelay jawaabahaaga laguma beddelan karo jawaabo ay cid kale leedahay.

## Sidan ayaad sameyneysaa

Waxaad su'aalaha uga jawaabi kartaa bogga intarneetka ee ra'yi baarista, waraaqaha ra'yi baarista ama adigoo billaabaya in aad adeegsatid app-ka Hälsometern. Dhanka midig ka dooro tilaamooyinka ee raac. Ka jawaabista ra'yi baaristu waxay qaadaneysaa 15 ilaa 30 daqiiqo.

Waad ku mahadsantahay in aad ka qeyb qaadaneysid.
Waxaad sameyneysaa farqi!

Cecilia Magnusson
Madaxa hawlaha shaqada, Xarunta aafooyiinka iyo dawada bulshada, Region Stockholm

### Barta intarneetka ee ra'yi baarista

Gal bogga www.indikator.org/halsa
Ku buuxi koodka jawaabaha: *Koodku wuxuu ku yaallaa warqadda kuugu soo dhacday sanduuqa boostada ee guriga.*
Waxaad sidoo kale kaamirada moobiilkaaga ku iskann-gareyn kartaa koodka QR-ka:
*Koodka QR-ku wuxuu ku yaallaa warqadda kudu soo dhacday guriga.*

### Waraaqaha ra'yi baarista

Waraaqo ra'yi baaris ayaa guriga laguugu soo dirayaa ku dhawaad afar usbuuc ka dib. Soo buuxi ee noogu soo dir baqshadda jawaabaha ee la socota.

### App

Dukaankaaga app-abka ka soo degso app-ka Hälsometern. Kaamirada taleefankaaga gacanta ayaad ku iskann-gareyn kartaa koodka QR-ka si aad toos halkaas ugu tagtid.

Ra'yi baaristan waxaa lagu heli karaa af-Iswiidhish iyo af-Ingiriis.
Xog dheeraad ah oo ku aaddan baaritaanka iyo sida macluumaadkaaga loo ilaalinayo waxay ku jiraan bogga dambe.

**Nala soo xiriir**
Haddii aad su'aalo ka qabtid baaritaanka ama aadan rabin in aad ka qeyb qaadatid nagala soo xiriir.

E-mail: folkhalsoenkat.slso@sll.se
Telefon: 08 - 123 371 81

# Maareynta macluumaadka iyo xog qarinta

## Macluumaadka shakhsiga ah ee aan maareyneyno

Waxaan maareyneynaa jawaabaha ra'yi baarista, mararka qaarna macluumaadka tallaabaha ee app-ka Hälsometern. Si aan si buuxda sawir uga qaadan karno caafimaadka, waxaa xogta aan ururineyno lagu dhameystirayaa macluumaad ku aaddan caafimaadka iyo waxyaabaha khatarta ku keeni kara oo laga soo qaatay diiwaanka Region Stockholm, Xafiiska Dhexe ee Tirakoobka, Guddiga Qaranka ee Caafimaadka, Qasnadda Ceymiska, Arkiifiyada Qaranka, Hey'adda Waajibaadka iyo Dib u Eegista, Magaalada Stockholm, Diiwaanka Tayada iyo Machadka Karolinska. Waxay macluumaadku ku saabsanyihiin qoyska, socdaalka, hoyga, aagga uu qofku degganyahay, xaaladda bulsho-dhaqaale, natiijooyinki baaritaannadi hore, caafimaadka, waqtiyadi qofka la siiyay daryeel caafimaad, dawo isticmaalidda, natiijada dhalidda, natiijada waxbarashada iyo gurmadki, iyo heerarka guuxa- iyo wasaqeynta hawada ee aagagga la xiriira hoyga. Maadaama dhaxalku uu saameyn karyo caafimaadka waxaa xitaa la soo qaadanayaa macluumaadka waaliddiinta, walaalaha iyo carruurta.

Si aan awood ugu yeelanno in aan intii waqti ah la soconno horumarka caafimaadka, waxaa laga yaabaa in aan mustaqbalka kula soo xiriirno oo aan ku weydiinno su'aalo dhameystir ah.

## Sidaan ayaa loo isticmaalayaa macluumaadka aan ururinno

Macluumaadka waxaa warbixinnada caafimaadka dadweynaha loogu lafaguri doonaa, la isuguna ururin doonaa si heer koox ahaaneed ah. Warbixinnada waxaa ay dadweynuhu ka heli karaan bogga ces.sll.se, waxyaabaha la isu ururiyayna waxay ku jiraan bogga folkhalsokollen.se.

Waxyaabaha la isu ururiyay waxaa isticmaalaya Region Stockholm iyo xaafadaha iyo degmooyinka Gobalka Stockholm, si loo qorsheeyo isbeddellada bulshada iyo daryeelka caafimaadka. Macluumaadka waxaa tirtirayaa toban sano ka dib marka ay diraasaddu dhammaato.

Ka qeyb qaadashadaada baaritaanka ama jawaabaha aad ku bixineysid ra'yi baaristu, wax saameyn ah kuma yeelan doonaan daryeelkaaga mustaqbalka ama adeegyada aad ka heshid Region Stockholm.

## Sidan ayaa loo ilaalinayaa xogta shakhsiga ah

Marka natiijada baaritaanka la soo bandhigayo kama muuqan doonto waxa aad adigu gaar ahaan ku jiwaabtay. Waxaa lafa guridda lagu sameynayaa macluumaad maldahan, taasoo micniheedu tahay in dhammaan aqoonsiyada lagu beddeli doono nambar tixraac. Waxaan adeegsan doonnaa oo keliya macluumaadka loogu baahanyahay lafa guridda markaas taagan.

Macluumaadkaaga waxaa lagu ilaalinayaa sharciga xog qarinta, dhammaan dadka ka shaqeeya baaritaanka iyo macluumaadka baaritaanka ka soo baxa waxaa saaran waajib xog qarin. Xog qarintu waxay u shaqeyneysaa si waafaqsan xeerka bannaanyaalnimada iyo xog qarinta. Sidoo kale waxaa macluumaadkaaga loo qarinayaa si waafaqsan xeerka Midowga Yurub ee ilaalinta macluumaadka (GDPR). Waxyaabaha sharci ahaan lagu saleynayo maareynta macluumaadka shakhsiga ah waa in ulajeeddada laga leeyahay ay tahay oo keliya mid dan bulshada u ah iyo mid lagama maarmaan u ah dano tirakoob la xiriira oo keliya. Dhammaan xogaha xaasaasiga ah waxaa lagu keydinayaa, laguna maareynayaa oo keliya kumbuyuutarro iyo maskax kumbuyuutar oo Iswiidhan yaalla oo lagu ilaalinayo hubsasho laba tallaable ah.

Region Stockholm gudihiisa waxaa maareynta macluumaadkaaga shakhsiga ah mas'uul ka ah aagga daryeelka caafimaadka ee gobalka (SLSO). Haddii aad qabtid su'aalo ku aaddan GDPR-ta iyo sida loo ilaalinayo macluumaadkaaga shakhsiga ah ku soo dhawaw in aad la soo xiriirtid wakiilka ilaalinta macluumaadka. E-mail u dir gdpr.slso@sll.se

## Macluumaad ka dalbo xogtaada shakhsiga ah

Waxaad xaq u leedahay in aad si lacag la'aan ah u heshid koobi ku aaddan macluumaadkaaga shakhsiga ah, isagoo u qaabeysan sida waxa loogu yeero wax diiwaan laga soo saaray. Codsashada wax diiwaan laga soo saaray waa in ay qoraal ahaataa, uuna soo saxiixo qofka ay khuseeyaan waxa la soo saarayo. Haddii aad u aragtid in Region Stockholm uu macluumaadkaaga shakhsiga ah u maareeyay si jebineysa xeerka xogta shakhsiga ah waxaad dalban kartaa in macluumaadka la saxo, la xannibo ama la tirtiro. Haddii aadan ku qanacsaneyn sida loo maareynayo macluumaadkaaga shakhsiga ah waxaad xaq u leedahay in aad dacwad u gudbisid Waaxda Ilaalinta Xogta Hoose ee Qofka, oo ah hey'ad korjoogteyn.

## Ku saabsan Hälsometern

Si loo ururiyo xog tan iminka ka fiican oo ku aaddan caafimaadka dadweynaha wuxuu Region Stockholm sameeyay app-ka Hälsometern oo loogu tala galay taleefannada Iphone-ka iyo taleefannada Android-ka. Hälsometern wuxuu jiryaa isagoo af-Iswiidhish iyo af-Ingiriis ah.

Hälsometern ayuu adeegsaduhu uga dhex jawaabi karyaa ra'yi baarisyada caafimaadka dadweynaha, dooran karyaane in uu dadka la wadaago xogta tallaabihiisa. Xogta tallaabaha waxaan muuqal fiican ugu heleynaa sida uu dadweynuhu u dhaqdhaqaaqo. Haddii aad dooratid in uu app-ku taleefanka kuugu sii jiryo waxaa laga weydiisan karaa in aad ra'yi baaris ka soo jawaabtid dhawr jeer sanadkiiba.

## Nagu saabsan

Waxaa baaritaanka sameyneysa Xarunta Aafooyinka iyo Dawada Bulshada (CES) oo qeyb ka ah Region Stockholm. CES waxay hawshiisu tahay in uu Stockholm dhexdeeda gacan uga geysto in la helo caafimaad fiican oo loo simanyahay isagoo faafinaya, huruumarinayana aqoonta caafimaadka dadweynaha. Waxaan ka shaqeynaa cilmi baaris iyo horuumarinta qaabab shaqo oo cuscusub iyo qaabab lagu sii hagaajin karo daryeelka caafimaadka, korna loogu qaadi karo caafimaadka Gobalka Stockholm gudihiisa.

Ra'yi baarista waxaa maamusha shirkadda madaxa baarista ee bannaan ee Institutet för kvalitetsindikatorer (Indikator).